

# Laboratory Services

## Abuurka Xaakada Abuurka 'Acid Fast' Saytooloji (Cytology)

### Fariimo:

Marka la qaadayo **saambal xaako**, waxa la rabaa inaad taqaanid faraqa u dhexeeya xaako, candhuuf iyo duufka sanka xaggiisa dambe. Saambalo ah candhuuf iyo duufka sanka xaggiisa dambe lama aqbali karo.

- **Xaako:-** Waa saambalka loo rabo abuur xaako. Waa wax ka soo go'a xagga hoose ee sambabada, kaasoo la heli karo marka si qoto dheer loo qufaco.
- **Candhuuf:-** Waa dheecaan biyo-biyo ah oo ka yimid afka (**lama aqbali karo**)
- **Duufka sanka xaggiisa dambe:-** waa xab adag oo ku yaala xagga dambe ee sanka ama cunaha (**lama aqbali karo**)

1. Ururinta, waxa laguu siiyay waxyaabahan soo socda:

- Weel saambal oo leh fur la maroojiyo oo jeermi-dilan oo midabkiisu yahay liin
- Waraaq fariimo

2. Xaakada ururi subixii, ka hor cuntada.

**FIIRO: Baadhista 'Acid Fast' guud ahaan waxa loo rabaa saddex saambal oo gooni loo kala ururiyay, saddex maalmood oo isku xigay. Raac fariimaha ku saabsan ururin kasta oo shaybaadhka u soo qaad saambal kasta isaga oo ku jira baraf maalin kasta.**

3. Ku qor weelka leh fur la maroojiyo **magacaaga hore iyo dambe, taariikhdaada dhalasho iyo taariikhda iyo wakhtiga ururinta.**

4. Si dhammeystiran afkaaga ku luqluq biyo.

5. **XOOG QOTO LEH U QUFAC** si aad u heshid xaako oo toos ugu rid weelka.

**Shaybaadhku wuxu rabaa qiyaastii hal qaado cunto oo ah xaako si loo sameeyo abuur iyo hal qaado cunto oo ah xaako oo loogu talogalay saambalka Saytooloji (Cytology).**

6. Si adag u xidh weelka.

7. Saambalka ku qajooji qaboojiyaha illaa laga keenayo shaybaadh.

8. Saambalka oo baraf saaran yahay, oo ku jira bac leh qful ah siib/jinyeer, sida ugu dhakhsaha badan ee suurtogal ah u keen shaybaadhka.